

**Sharciga 29 Abril 1953, lamba. 430 (lagu baahiyay Faafinta Rasmiga Jamhuuriyada Talyaaniga 16 Juun 1953, lamba. 135).**

**Baabi'inta Wasaaradda Afrikada Talyaaniga.**

Golaha Baarlamaanka iyo Golaha Odayaasha (Senatka) waxay meelmariyeen

## **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

### **WUXUU ANSIXIYAY**

Xeerka soo socda:

#### **Qod. 1**

Wasaaradda Afrikada Talyaaniga, oo lagu dhisay dekeretada boqortooyada 20 Nofember 1912, lamba. 205 oo lagu baddalay dekereetada boqortooyada 8 Abril 1937, lamba. 431, waa baabi'iyay.

#### **Qod. 2**

Xilalkii arrimaha maamulka Wasaaradda Afrikada Talyaaniga waxaa loo wareejiyay sida soo socota:

1. Wasaaradda arrimaha dibadda;
  - a) xilalkii la xariiray Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya;
  - b) xilalkii la xariiray danaha guud iyo kuwa gaar ahaaneed iyo adeegyada guud ee talyaaniga dalalka Liibiya iyo Eritrea;
  - c) xilalka la xariiray kaalmada waddaniyiinta talyaaniga ee deggan dalalkii la gumaystay iyo muwaadiniinta talyaaniga ee ku sugan xaaladaha ku xusan qod. 32 xeerka 4 Maarso 1952, lr.137;
  - d) adeegyada lagu galo dalka Talyaaniga iyo ku noqoshada Afrika ee muwaadiniinta talyaaniga;
  - e) xilalka la xariira Machadka beeraha Afrikada Talyaaniha, sida ku cad shuuruudaha dekeretada boqortooyada 27 Juulay 1938, lr.137; d) keydinta Arkiiyada taariikheed.
2. Wasaaradda gudaha:
  - a) xilalkii arrimaha gargaarka, ee gudaha dhulka qaranka, dadka soo qaxay iyo kuwa u dhashay Liibiya, Soomaaliya, Eritrea iyo Etiobiya;
  - b) xilalka loo wakiishay Wasaaradda Afrikada Talyaaniga dekereetada 26 Feb. 1948, lamba. 104, oo ku saabsan ballaarinta qaaxootiga Afrikada Talyaaniga waxtarrada loogu talagalay dagaal ka soo harka;
3. xilalkii la xariiray Ciidamadi Boliiska Afrikada Talyaaniga oo la baabi'iyay Wasaaradda Maaliyadda:
  - a) adegyadii iyo Urur-hantiyeeedka keliyeelashada (monopolio) dawladeed ee mooska ee ku xusan dekeretada boqortooyada 2 Dicember 1935, lr.2085 iyo wax ka baddaladii ka damneeyay.
4. Wasaaradda Shaqada:
  - a) xilalkii la xariiray arrimaha magdhowga dhibaatooyinla dagaalka ee dalka ee horay ku jiray xukunka Talyaaniga ee Afrika;
  - b) xilalkii la xariiray xaq-gudidda maarayntii la soo dhaafay ee faaiidada iyo

khasaaraha, ee Xukuumadihii gumaysiga, marka laga reebo midda ka dambeysay lr. 5 iyo sidoo kale xilalka la xariira xisaab celinta iyo dib u-eegista xisaabaadka aan waqtigoodi la bixin sida ku cad dekereetada 17 Juulay 1947, lamba. 1180, iyo wax ka baddaladii ka dambeyay.

5. Ciidanka nabadgalyada wixii la xariira habaynta iyo xaq-gudidda heshiisyadii dagaalka ee ay gashay Wasaaradda Khasnadda; xilalkii la xariira xaq-gudidda kharshkii lagu lahaa maayntii hore ee Xukuumadihii gumaysiga ee saad-siinta, dalabyadii, hawlihii guud iyo waxqabadyadii kala duwanaa sida ku xusan xeerka 5 Disember 1941, lr1477, iyo shuruucdi ka dambeeyay ee midaynta, sidoo kale magdhowga kharshka leh dabeecadda gargaarka ee lagu galay Afrikada Bari sida ku cad dekereetada baarlamaaneed ee Madaxwynahe Ku-meelgaarka ee Dawladda 20 Janaayo 1947, lamba. 59.

Qaraarada Guddoomiyaha waxaa la diyaarinayaa iyadoo loo hoggaansamayo dekereetada baarlamaaneed 23 maarso 1948, lr674, ee lagu habeyayay heshiisyadii dagaalka iyo soo xaraynta deeqihi, iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay marka la dabbaqi karo.

6. Wasaaradda Diffaaca:

a) xilalkii ay qabanaysay Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ee khuseeyay cinwaan kasta, shaqaalahii ciidamada iyo kuwa qaabka ciidamada u abaabulan, marka laga reebo hawladeenadii madaniga ee Dawladda ee u abaabulnaa qaabka ciidamadaa, ee horay u shaqeeyay ama ka shaqeeya dalalka uu talyaanigu xakumo oo illaa hadda ka hawgala dalalka Libia iyo Eritrea;

b) adeegga hawlaha ciidamada.

### **Qod. 3**

Guddiga loo xilsaaray bixinta xisaabaadka dadkii ku waxyeeloobay dagaalka, ee ku xusan dekereetada 30 Nofember 1945, lamba. 879, oo xilkiisasa ka qabanayaa Wasaaradda lhasnadda.

Guddiga ku xusan qod.1 ee dekeretada boqortooyada 21 Disember 1918, lr.2109 ee ku saabsan eegista keydka hawlaha guud ee ka socda Afrika talyaaniga iyo qodobada 2 iyo 9 xeerka 5 Disember 1941, lr.1477, ee ku saabsan bixinta xisaabaadka daymihii ku saabsana saad-siinta, hawlihii guud ee kala duwanaa ee laga qabtay Afrikadii Talyaaniga waa la baabi'iyay iyadoo hawlihii la xariiray loo wareejiyay Guddiga ku xusan qod. 2 ee dekereetada baarlamaaneed 25 Maarso 1948, lr.674 ee ku yaalla Ciidanka nabadgalyada e qaabilsan habaynta iyo xaq-gudidda heshiisyadi dagaalka. Guddiga la sheegay waxaa lagu biirinayaa, marka laga hadlayo arrimihii horay lagu wareejiya Wasaaradda Arrimaha Afrikada Talyaaniga, laba sarkaal oo ka socda Wasaaraddii la baabi'iyay oo lagu soo magacaabo dekereeto Guddoomiyaha Golaha Wasiirada, uuna soo jeediyo Wasiirka Khasnadda.

### **Qod. 4**

Dekereeto Madxweynaha Jamhuuriyadda, oo Guddoomiyaha Golaha Wasiirada ku soo taliya, lana soo marsiiyo Wasiirada shaqada ku leh iyo midka qasnadda, ayaa waxaa lagu wareejinayaa Maamullo kale ee Dawladda, iyadoo lagu saleynayo hannaanka danaha muhiimka ee shaqeynaya, xilalkii horay ay haysay Wasaaradda la baabi'iyay ee Afrikada Talyaaniga marka loo eego machadyadii, shirkadahii iyo ururadii nooc kasta iyo magac kasta ha lahaadeen. Xukuumadda waxaa loo wakiishay in ay nidaamiso, lix bilood gudahood kadib marka xeerkanu dhaqan galo, iyadoo uu soo jeedinayo Guddoomiyaha Golaha Wasiirada, lana soo marsiinayo Wasiirada shaqada ku leh iyo Wasiirka Khasnadda, kooxaysiga ah ama isku darka wakaaladaha dawladda ee leh ulajeedddooyin dhaqaale, ama dabeecad kale, ee horay uga shaqeynaya Afrikada Talyaaniga, sidoo kale tirada la xarashayo kuawa keydintoodu aanay wax faaiida ah u

lahayn. Qaraarada lagu amrayo xaraashka oo ay u sii dheertahay hawl wadenada xaraashka, waxaa la go'aaminayaa habka xaraashka sidoo kale mudnaanta gaara ahaaneed, oo la eegay isla shaqaalaha hawsha haya.

#### **Qod. 5**

Qaybaha laga gooyay Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ee aan ka mid ahayn qod. 3 xeerka 1 Maarso 1949, lamba. 51, waa baaba'ayaan muddo laba bilood gudahood maeka laga joogo taariikhda dhaqangalka xeerkaan. Isla marka ay muddadu dhammaato waxaa la baabi'inayaa Keydka gaarka ee isku qasan ee Napoli.

Xisaabiyaha dhexe ee Wasaaradda Afrikada Talyaaniga isna waa la baabi'iyay.

#### **Qod. 6**

Fulinta arrimaha qodobada sare lagu soo sheegay, oo ku saabsan maamulka shaqaalaha iyo dardargelinta iyo xilalka xerkaan lagu xusay, waxaa loo abuuray, in ay hoos tagaan Guddoonka Golaha Wasiirada, muddo aan sanad ka badnayn marka xeerkanu dhaqangalo "Xaafiiska qaabilsan arrimaha Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ee la baabi'iyay", waxaana hoggaaminaya sarkaal aan ka hooseyn darajada 4aad ee Maamulka la soo sheegay, oo ay dekereto ku soo magacaabaan Golaha Wasiirada, kana caawiya tirada ugu yar oo lagama maarmaan u ah shaqaalaha kooxda, darajada iyo qayb kasta, oo lagu caddeynayo isla dekereetada.

Arrimaha iqtisaaska Xaafiiska lagu soo sheegay faqradda sare oo xeerkaan aanu si ka duwan u sheegin, xilalka iyo awoodaha u sugnaaday, oo lagu saleeyo shuruucda jirta, Wasiirka Afrikada Talyaaniga waxaa loo warejiyay Gudoomiyaha Golaha Wasiirada kaaso u soo wakiilan kara idil ahaan ama qayb ahaan, Wasiir Ku-xeegeenka Dowlaha Guddoonka Golaha Wasiirada. Hawlaha Xisaabaadka ee Xaafiiska la soo sheegay, Wasiirka Khasnadda wuxuu diyaarinayaa Xaafiis Xisaabiye oo leh isla xilalka Xisaabiyaasha dhexe.

#### **Qod. 7**

Waxaa laga Joojin karaa shaqada shaqaalaha joogtada, da' kasta uu jiro iyo muddo dheer kasta ee uu shaqeeyay, oo ah shaqaalaha qandaraaska caadiga ah iyo shaqaalaha ku meelgaarka ee ku ah Wasaaradda Talyaaniga ee Afrika, kaddib markii ay dhammaato muddada saddexda bilood ee taariikhda dhaqan galinta sharcigan, uu u gudbiyo codsi Xaafiiska lagu aasaasay qodbka 6aad ee kor ku xusan.

Iyadoo lagu saleynayo codsi loo gudbiyo Xaafiiska iyo isla muddada lagu sheegay faqradda sare, waxaa la oggolyahay in laga joojio sidoo kale shaqada shaqaalaha lagu qaatay qandaraas gaara muddo aan la xaddidin oo loogu talagalay in ay ka qabtaan Maamulka Afrikada Talyaaniga hawl ku-meelgaara ama Maamul kale ee Dawladda si waafaqsan xeerka 16 Setember 1940, lr.1450, iyo dekereetada baarlamaniga 8 Maajo 1948, lr.839, ama ku sugan dalalaki talyaanigu uu horay u gumaystay ee hoos taga masuuliin maxalliya, oo mushaar laga siiyo, xitaa qayb ahaan miisaaniyadda Dawladda Talyaaniga.

Joojinta shaqada waxay dhaqangalaysaa lillaa 16 bisha, sida ugu dhaqsiiyaha badan ee ku xiga marka la baxshay qaraarkaas.

#### **Qod. 8**

Shaqaalaha joogtada ee Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ee fasaxa la galiyay sida ku cad qod.7 ee la soo sheegay, waxaa u sugnaatay:

- a) kordhinta shan sano, oo sare loo qaado 7 jeer kuwooda leh sifooyinka dagaallamayaal,

jabhado soo dagaalay ama qaxooti Afrika, shaqo waxtar u leh hawlgabka, ha ahaadeen wax lagu gaarayo waayeelnimada xilka ee looga baahanyahay helitaanka xaq hawlgabka ama xaq-guddidda hawlgabka ama gunno mar keliya ah;

b) waxaa lagu darayaa dhaqaalaynta hawlgabka la siinayo lacag hal mar wax lagu xallinayo, oo la eg faraqa, muddada looga baahanyahay gaarista da'da 65 sano iyo sikastaba aan ka badnayn laba sano, ee u dhexeysa inta uu shaqda dibadda ka jooga hawlgabnimada iyo lacag lagu siiyo cuntada qaaliga, iyo midka hawlgallada magaca mushaarka, gunnada cuntada qaaliga ah, oo ay ku jiraan wixii qaybo/kooto dhammaystiran, iyo gunnada xilhaynta ama gunno u dhiganta, oo la xisaabinayo qiyaastii u sugnaatay marka ay dhammato muddada la keenay codsiga joojinta shaqada, iyo weliba lacag la eg hal sanadle dhaqaalaynta la soo sheegay ee hawlgallada;

c) waxaa lagu darayaa gunno hal mara, oo la xaq-gudayo sababo dhowr siddeedaad ee saldhigga hawlgabka lagu geli karo inta sano ee uu shaqada waxtarka leh hayay, mid sanadle ah ee mushaarka, ee gunnada cuntada qaaliyowday, oo ay ku jiraan wixii kale qaybaha dhammaystiran, iyo gunnada xilhaynta ama lacag u dhiganta oo la xisaabinayo qiyaastii u sugnaatay marka ay dhammato muddada la keenay codsiga joojinta shaqada.

### **Qod. 9**

Shaqaalaha lagu qaatay qandaraaska qaabka sharciga, oo lagu oggolaaday dekeretada Wasiireed 30 Abril 1929, Ir.129, iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay iyo sidoo kale shaqalaha ku-meelgaarka ee Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ay si ku-meelgaara shaqada uga joojisay, waxaa la siinayaa, haddii shaqada looga joojiyay qaabka qod. 7, gunno la eg mushaarka bila badan ama lacago, iyo gunnada xilhaynta ama lacag u dhiganta, qiyaasta inta u sugnantay taariikhda ay dhacday muddada lagu soo gudbiyay codsiga shaqa joojinta, inta sano ama jajibka sano ee ka sarreeya lix bilood ee uu shaqada hayay.

Shaqaalaha lagu soo tilmaamay faqradda labaad ee qod. 7, gunnada waxaa lagu xaq-gudayaa qiyaasta iyo qaababka lagu sheegay faqrada sare. Marka la barbar dhigo isla shaqaalahaas, waxaa loo aqoonsanayaa kuwa waxtara marka la xisaabinayo gunnada qodobkaan lagu soo sheegay:

a) shaqdii ay ka hayeen Xukuumadihii Afrikada Bari iyo Libia ee la baabi'iyay iyo wixii goobo kale ee dagallada lagu qabsaday;

b) Xilliga waqtiga lagu qaatay xeryihii xabsiyada ama xabsiyada gudaha, illaa lix bilood oo laga jooga dhaqangalka heshiiskii nabadda, sikastaba lagu qaatay meelaha xoogga lagu qabsaday ee dhulkii Afrikada Bari ee uu ka talinayay talyaanigu;

c) Xiliga waqtigii la soo dhaafay, illaa ugu badnaan laba sano, oo u dhexeysa taariikhda dhicitaanka ruqsaynta gumaysiga iyo midka Maamulka Dawladda uu u xilsaaray sida ku cad xeerka 16 Serember 1940, Ir. 1450 iyo dekeretada baarlamaniga 8 Maajo 1948, lamba. 839;

d) shaqadii uu hayay inta uu ka tirsanaa Mamulka Dawladda, oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madax bannaan, sida ku cad Xeerarka 10 Setember 1940, Ir.1450, iyo dekeretada baarlamaaniga 8 Maajo 1948, lamba. 839.

Intaa waxaa sii dheer gunnada ku xusan faqradda sare, waxaa la siinayaa shaqaalaha loogu talagalay lixbiloodle lacagaha lagu sheegay faqradda koobaad ee qodobkaan waxaana loo wareejiinayaa milkiyad, kuwooda caymiska ku jira.

### **Qod. 10**

Amarrada ku qora qodobada 7 iyo 8 ee sare waa lagu dabbaqi karaa xitaa shaqaalaha horay uga tirsanaa Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga kuwaaso, sida ku xusan dekereetada baarlamaaneed 7 Abril 1948, Ir. 262, iyo xeerka 5 Juun 1951, lamba. 376:

- a) lagu meeleyay kaalimaha kalaguurka ama kaalimaha darajooinka u dhigma Mamullada kale ee Dawladda, oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madax bannaan;
- b) kadib dhaqngalka xeerkaan in uu diiday meelaynta kaalimaha gaarka ee ku meelgaarka ama jagooyinka u dhigma;
- c) codsaday meelaynta kaalimaha gaarka ee ku-meelgaarka, oo aan weli helin jawaabta codsigiisa.

Xaaladaha lagu sheegay xarfaha a) iyo c) codsiga lagu sheegay qod. 7 waa in lagu keenaa muddada lagu caddeeyay faqradda koobaad ee isla qodobka. Xaaladda lagu sheegay xarfaha b) codsiga waa in lagu soo gudbiyaa saddex bilood gudahood oo ka soo baaabata qoraalka wargalinta diidmada meelaynta.

### **Qod. 11**

Saraakiisha dowlada, ee gacanta ku haya shuruudaha ku xusan lambarrada. 1, 2, 3 iyo 4 ee qodobka 17 ee sharciga 27 November 1933, n. 1578, oo ka joogsada ashaqada iyadoo lagu dabaqayo qodobadii hore waxay xaq u leeyihiin, markay codsadaan hal sano gudahood laga bilaabo dhaqan galinta sharcigan, in laga diiwaangeliyo liistada dacwad oogayaasha iyo qareennada, waa haddii ay shaqeeyeen, siday u kala horreeyaan, Toban ama shan iyo toban sano ay u shaqeeyeen Maamulka Afrika, oo ugu yaraan kalabaroo bar muddada gumeysiga.

Saraakiisha joogtada ee Wasaarada Afrikada Talyaaniga, ee shaqada haya taariikhda xeerkaan, ee leh shuruudaha soo socda:

- a) shahaada jaamacadeed ee qanuunka;
- b) waayeelnimada xilka shaqada dawladda ee Wasaaradda Afrikada Talyaaniga muddo aan ka yareyn 12 sano;
- c) qaatay tababarka xirfadda hawlaha xirfadda notaayada muddada lagu sheegay xeerarka jira;
- d) aan aqbalin dhaqaalaynta nasashada shaqada, waxa loo magacaabi karaa tira ka badan intii loogu talagalay xarumaha notaayada, kadib markii loo tartamo, waxaase shardi ah in ay leeyihiin shuruudaha u qalmidda.

### **Qod. 12**

Shaqaalaha, marka xeerkan uu dhaqangalay bannaanka ka joogay Maamul ka duwan midka Afrikada Talyaaniga oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madax bannaan, waxay ka sii wadanayaan shaqada meelaha hadda ay joogaan. Shaqaalaha hayay hawlaha la wareejiyay sida ku xusan qod. 2 waxay shaqada ka sii wadayaan meelahoodi loogu talagalay, iyadoo hoos imanaya Wasaaradaha loo wareejiintu.

Shaqaalihii hayay shaqooyinka xaafisyadii la baabi'iyay ama kadib marka uu xeerkaan dhaqangalay ee ka soo galay Talyaaniga dalakii Afrikada Talyaaniga uu xakumay, oo aan lagu qorin Xaafiiska lagu sheegay qod. 6, waxaa loo qaybinayaa, xilal madaxnimo, ee ka mid Maamulada uu tixgalinay qod. 3 ee la soo sheegay iyo Maamullo kale ee dawladda, oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madaxa bannaan, iyadoo lagu salaynayo si u dhiganta baahidooda. Qaraarada madaxda waxaa loo isticmaalayaa dekereeto Guddoomiyaha Golaha Wasiirada, marka ay soo jeediyaan Wasiirada daneynaya iyo kan Khasnadda. Shaqaalaha la xukumay waxaa u

sugnaaday laga soo bilaabo taariikhda amarka uu dhaqangalay Maamulka ay ku socoto waxaa saaran daryeelka dhaqaalaha dhammaystiran, iyadoo lagu salaynayo nidaamyadii ka jiray kooxda shaqaalaha ee la mida, qaybta iyo darajada Maamulka la soo sheegay ee shaqada ka haya isla goobta iyo haya isla camalkaas.

Shaqaalaha joogtada ah waxay heli karaan, xitaa wax ka baddalan xeerarka gaarka ee jira, xilalka idil ee hoggaaninta, kormeridda, fulinta iyo awaamirta la jideeyay ee u sugnaatay shaqaalaha kooxda la siman iyo darajada oo la mida kaalimaha madaxnimada Maamulada. Amarrada faqradda sare waxaa xitaa lagu dabbaqayaa shaqaalahii wakaaladaha ka tirsanaa Dawladihii baaba'ay ee Afrikada Bari iyo Libia oo loogu talagay in ay shaqa ku-meelgaara ka qabtaan Wasaaradda Arrimaha Talyaaniga iyo Maamullo kale ee dawladeed sida ku cad xerka 16 setember 1948, lr. 1450, iyo dekereetada baarlamaniga 8 Maajo 1948, lr. 830. Kuwaas waxaa lagu dabbaqaya sidoo kale shaqaalaha soo gudbiyay codsiyada joojinta shaqada sida ku cad faqradda sare.

### **Qod. 13**

Shaqaalaha qandaraaska ku jooga oo aan lahayn iqtiyaarka uu oggolaanayo qod. 14 ee xeerka 7 April 1951, lamba. 37 oo xambaarsan xeerakar dhammaystiran iyo lagu fulinayo dekereetda baarlamaaniga 7 April 1951, lr262, kuna saabsan dhisidda kaalimaha gaarka ee ku-meelgaarka ee Maamul dawladeedka dhexdiisa, waxay sii haaysanayaan xaaladahooda sharci iyo dhaqaale ee ay hadda ku suganyihiin iyadoo qandaraaska nooca ee lagu meelmariyay dekereetada Wasaaradeed 30 April 1920, lr. 129, iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay. Xaafiiska lagu soo sheegay qod. 6 ama Maamulada , oo ay ku jiraan kuwa leh nidaamka madaxa bannaan, oo ay ka mid yihiin isla shaqaalahaas waa la qaybinayaa, waxayna cusbonaysiinayaan qandaraaskii, marka ay codsadaan kuwa danaynaya, dhammaadka muddo kasta illaa ay gaaraan da'da 65 sano., ama 40 sano oo shaqada lagu jiro.

Shaqaalaha aan codsan cusboonaysiinta qandaraaska muddada dhicitaanka hore, kadib dhaqangalka xeerkaan, waxaa la siinayaa gunno qiyaas ahaan la eg midda lagu sheegay faqradda koobaad ee qod.9, iyadoo xisaabta dhaqalaynta u sugnaatay lagu salaynayo taariikhda dhammaadka qandaraaska.

Xeerka wakiilnimadaa ee ku xusan qod. 18 ee soo socda waxaa lagu siinayaa oo lagu xaqiijinayaa dhaqalaynta nasashada shaqaalaha lagu sheegay faqradda koobaad si iyaga sikastaba aanay ka hoos marin wixii u sugnaan lahaa marka ay u gudbaan kaalimaha gaaraka ee ku-meelgaarka.

### **Qod. 14**

Dekereeto uu soo saaro Guddoomiyaha Golaha Wasiirada, oo ay soo jeediyaan Wasiirada danaynaya , shaqaalaha lagu sheegay qod. 13 ee la soo sheegay, ee shaqeeyanayay, taariikhda dhaqangalka xeerkaan, ee ku sugan Maamullo dawladeed kale, waxaa loo wareejinayaa si ay ka mid noqdaan isla Maamulkaas; kuwaa ka shaqeeynayay isla taariikhdaas Wasaaradda Afrikada Talyaniga ee la baabi'iyay waxaa loo qaybinayaa Maamul dawladeed kale, iyadoo ay ku jiraan kuwa leh nidaamka madaxa bannaan, iyadoo lagu saleynayo baahidooda. Awoodda iqtiyaariga ee Maamulka oo ah in uu si kama dambaysa wax u meeleezo wixii la xariira baahiyada shaqada, loogana faaidaysto shaqaalahaas iyaga ee jooga xaafiisyadooda dhexe iyo meelaha dibadaha; iyo suurtaganimada xitaa xilalka madaxnimada, oo laga qabto Maamul Dawladed ee kale, wakaalado dawladeed iyo kuwo maxalliya.

### Qod. 15

Shaqaalaha ku jooga qandaraaska waqti aan la xaddidin, marka xeerkanu uu dhaqangalay, oo ay caddaato inu shaqa ka hayay Maamulka Dawladda, oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madax bannan ee aan la hayn iqtiyaarka lagu sheegay qod. 7, waxaa lagu meelaynayaa laga bilaabo marka xeerkaan uu dhaqangalao, qaybta shaqaalaha dawladda kaalimaha gaarka ee ku xusan dekeeretada xeerka boqortooyada 4 Feb. 1937, Ir100, iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay, iyadoo lagu saleynayo aqoontooda iyo shaqooyinkii ay soo qabteen isla taariikhahaas, sidoo kale qaybaha Maamulka ay ka tirsanaayeen oo aanay ku jirin mowduuca, ee ku saabsan lacag-bixin kasta ee waqtigeedi aan la bixin. Marka laga reebo awoodaha iyo iqtiyarka uu soo saaray Guddiga wasiirada ee ku xuan dekeeretada Wassaradeed 20 December 1940, lamba. 10219, qiimeynta iyo qeexida wadcigiisa sharciyeed iyo dhaqaaleed ee shaqaalaha ku xusan faqradda hore, waxaa loo keydinaya, cinwanka jeeg shaqaalaha, oo dib loogu soo biirinayo wixii lacago dambe u kordha ee dheeraadka dhaqalaynta cinwaanka mushaarka, ee u sugnaaday marka la dabbaqayo meelaynta horay loo soo saaray ama Guddiga la soo sheegay uu soo saari doona, marka loo eego mushaarka la xariira qaybta shaxda I ee ku lifaaqan dekeretada-xeerka boqortooyada 4 Feb. 1937, Ir.100, iyo wax ka badallada ka dambeeya, iyadoo tirada lagu darayo waayeelnimada xilka ee hawlaha dawladeed.

Marka la isbabardhigo shaqaalaha iyaga waxaa loo xisaabinayaa shaqa waxtar ah iyo mid aan kala joogsan marka loo eego ulajeddoyinka kororka xilliyeedka iyo dhaqalaynta nasashada loogu talagalay shaqaalaha aan joogtada ahayn ee haya shaqooyinka iyo xilliyada waqtiga lagu tilmamay xarfaha a),b), c) iyo d) ee faqradda koobaad e qod. 9 ee la soo sheegay. Shaqaalaha lagu soo sheegay faqradda koobaad ee qodobkaan, kuwaaso taariikhda uu dhaqangalay xeerkaan, ku sugan xaaladaha ku xusan xeerka 16 setember1940, Ir. 1450, iyo dekeeretada baarlamaaneed 8 maajo 1948, Ir.839, aan ka mid ahayn kuwa Maamulka Daawladda aan looga faaidaysanayn, waa la ruqsaynaya iyago leh xaq dhaqaalaynta dhaqaalaha ku cad qod. 9 ee la soo sheegay, iyadoo la eegayo xaddiga u sugnaaday isla taariikhdaas. Ujeeddadaas waxan ku jirin xisaabinta muddada ku xusan xarafka c) ee qodobka la soo sheegay ama aanay u sugnaan wax jeeg/lacaga xilliyadi u dhexeeyay taariikhda dhicitaanka fasaxa xilligi gumaysiga iyo taariikhda ruqsaynta.

### Qod. 16

Wixii la xariira oggolaashaha tartanka, xitaa haddii horay loo shaaciyay taariikhda dhaqangalka xeerkaan, arrimaha ku saabsan dallacadda darjada 8 ee kooxda A, darajada 9 ee kooxda B, darajda 11 ee kooxda C kaalimahii Wasaaraddii Afrikada ee la baabi'iyay ma samaynayso sababa looga baahanyahay in ay ka soo shaqeeyeen dalalkii Afrika Talyaaniga ee uu xukimi jiray.

Barnaamijka tijaabada tartanka waxaa lagu soo saarayaa dekeereto Wasaaradeed. Tartamada la soo sheegay, xitaa haddi horay loo shaaciyay marka uu xeerkaan dhaqangalay, ka sokow ku guulaystay waa la dallacinayaa, xitaa kuwa lo baahdo ee tirada dheeraadka, musharaxiinta muujiyay in ay u qalmaan sida ku cad faqradda labad qod. 42 ee dekeereetada boqortooyada 30 December 1923, Ir. 2960, oo ay u bislaatay waayeelnimada xilka joogtada ugu yaraan koob iyo toban sano haddii uu ahaa kooxda A, laba iyo toban sano, haddise uu ahaa kooxda B, saddex iyo toban sano haddi uu ahaa kooxda C. Marka la fulinayo xeerka wakiilnimada sida ku cad faqradda koobad qod. 18, wareejinta kaalimaha ee Maamulada kale ee dawladda shaqaalaha loo oggolaaday in ay ka qaybgalaan tartamada lagu soo sheegay faqradaa sare waa in uu dhacaa ka hor inta aan la gunaanadin

tartamada iyaga, wareejinta iyada ah waxaa la samaynayaa iyadoo dib lo dhigayo arrimaha la xariira darajada iyo wayeelnimada xilka.

### **Qod. 17**

Muddada ku xusan waqtiga qod. 6 ee xeerkaan, jagooyinka kaalimaha ee Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ka bannaanaada darajooyinka aan ka sarreynin shanaadka, oo ay saamaysay joogsiga shaqooyinka ku xusan qod. 7 ee hore waxa la siin karaa dallacaad qaddar aan ka badnayn kala bar/nus.

Xilalka Golaha maamulka waxaa qabanaya Guddii uu ka madaxyahaya Wasiir ku-xigenka Dowlaha Guddoonka Golaha Wasiirada oo ka kooban sarkaal laga soo magacabay Xaafiiska lagu xusay qod. 6, iyo sidoo kale saddex sarkaal oo leh darajada 5aad oo ka tirsan shaqaalihii Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga ee la baabi'iyay, kuwaaso lagu soo magacaabo dekereeto Guddoomiye Golaha Wasiirada.

Arrimaha ku saabsan keli ahaan qaybaha farasmada waxaa soo galaya kana soo qaybgalaya sarkaal darajadaa A ee ugu sarreeya kooxdiiisa.

Guddiga anshax-marinta wuxuu ka koobanyahay saddex sarkaal oo ka mida kalimaha Wasaaradda Afrikada Talyaaniga ee la baabi'iyay, kuwaaso mid ahaan aanu ka hoosaynin darajada 5aad oo madax u noqonaya iyo laba laga soo xulo saraakiisha haysta darajada 6aad. Arrimaha ku saabsan shaqaalaha ku jooga qandaraaska nooca (tipo) ee ku xusan dekereetada Wasaaradeed 20 Abril 1929, lr.129, iyo wax ka baddaladii ka dambeyay, kuwa ku jooga qandaraaska muddada aan la xaddidin ee ku xusan dekereetda-xeerka boqortooyada 12 Setember 1935, lamba. 110 iyo kuwa ka tirsanaa wakaaladahii Xukuumadihii Gumaysiga waxay ka sii hawl galaan Xaafiiska Arrimaha Wasaaradda Afrika Talyaaniga ee la baabi'iyay Guddiyada dhisnaa, siday isugu xigaan, dekereetooyinka Wasaaradeed 15 Jannaayo 1945, lamba.16, iyo 20 Dicember 1949, lamba.10219.

### **Qod. 18**

Guddiga waxaa loo wakiishay in uu soo saaro, affar bilood gudahood oo ka bilaabata taariikhda dhaqangalka xeerkaan, shuruucda looga baahanyahay in lagu nidaamiyo iyo lagu fuliyo wareejinta shaqaalaha kaalimaha dhismaha/tirada ee Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga la baabi'iyay kaalimahii ay ku lahayeen Maamulada kale ee Dawladda, xitaa kuwa leh nidaam madaxa bannaan, oo shardi looga dhigayo in ay shaqaalaha u ballan qaadaan keydinta wayeelnimada shaqada, darajada iyo waayeelnimada darajada ee lagu helay kaalimahii laga yimid, iyo sidoo kale, isbarbar-dhigidda buuxda ee shaqaalaha kaalimaha Maamulka halkii loogu talagalay ama mid u dhigma iyo mid la mida horumarka caadiga ee xilka shaqada. Si ulajeeddadaa loo gaaro xeerarka loo wakiishay waxay ka abuurayaan si ku-meelgaara Maamul kasta oo ay ku jiraan kuwa leh nidaam madaxa bannaan iyadoo loo eegayo baahiyadooda jagooyinkii lagu soo daray kaalimihii caadiga iyo xitaa kaalimihi laga soocay ee lagu soo daray kaalimihii caadiga, iyadoo markastaba lala ekeynayo tirada jagooyinka tirada shaqalaha ka tirsan kaalimaha xubnaha Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga ee la baabi'iyay, waxaa lagu wareejinayaa isla Maamulkaas; labada tusaale, kaalimaha waxay qaadanayaan tiro jagooyin ku habboon ee darajada sare oo la buuxinayo si loo dallaciyo kuwa ka tirsan kaalinta marka ay dhacaan waxyaabaha suurtagalka ah, marka la eego shuruucda jirta. Jagooyinka sidaas lagu abuuray sina sabab la aan lama siin karo shaqaale meela kale ka yimid.

Xukuumaddu sidoo kale waxaa loo wakiishay in ay soo saarto affar bilood gudahood oo ka bilaabata dhaqngalka xeerkan, xeerka loo baahanyahay in lagu nidaamiyo dhammaadka shaqooyinka iska wax u qabso ee shaqaalaha arrimaha caafimaadka wakaaladaha hoos yimaada



Xukuumadihii Afrikada Bari iyo Libia, iyo sidoo kale shaqaalahii horay u shaqeynayay oo xiriir shaqa joogto ah ka hayay Rugta Ganacsiga Libia, Xaafiiska dhaqaalaha ee Eritrea, Guddiga dhaqaalaha ee Soomaaliya, Xaafiisyada dhaqaale ee gumaysiga, oo laga soo bilaabo taariikhda dhaqangalka xeerkaan, ay muuqato in Maamulada Dawladda ay ka faaiidaysanayaan iyado la dabbaqayo xeerka 16 Dicember 1940, lr.1450, iyowax ka baddaldihii ka dambeeyay, iyo habayntii uu ku sameeyay Maamulka dawladda shaqaalaha aan ka faaidaysan iqtarkaas.

Qaraaradaas waa in ay qeexaan qaabaka wax lagu qiimynayo, iyadoo loo daneynayo kuwaas la maamulo, shaqada ay qabteen wakaladaha iyaga, sidoo kale hawsha ay ka qabteen xaafiisyada Maamulka Dawladda ay ka shaqeeyeen ama qaab kastaba ay uga tirsanaayeen, iyo loo tixgelinayo sikastaba in ay qabteen shaqo waxtar leh iyo joogto ah iyo muddada waqtiga lagu sheegay xarfaha a), b) c) iyo d) faqradda ka horreysa kan ugu dambeeya ee qod. 9. Galladaha/ deqaha lagu habeynayo dekereerada iyada shaqaalaha Wakaaladihii hoos imaanayay Xukuumadihi Afrika Bari iyo Libiyae baaba'ay waa in ay la jaan qaadaan kuwa horay loo soo barbaariyay ama la barbaari doono kuwoodi hoos imaanayay wakaaladahii dawladda dalalkii heshiiskii nabadda awgiis uu ku joogsaday xukunkii dawladda Talyaaniga; kuwa, laakiin, shaqaalaha ka soo haray ee lagu tilmaamay faqradda sare waa in ay la jaan qaadan dekereetda boqortooyada 20 Setember 1934, lr.2011. iyo wax ka baddaladii ka dambeeyay, iyo kuwa dekereetada boqortooyada 6 Agosto 1936, lamba. 1639.

a) Isla qaraarka wakiilashada waxaa lagu soo saarayaa xeerar ku habboon oo u oggolaanaya:

qaybinta shaqaalahii caafimaadka ee qaybta koobaad ee Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga ee baaba'day, oo lagu qoray qandaraaska nooca oo aan codsan cusboonaysiinta qandaraska uu oggolyahay qod. 13, iyo isla shaqaalaha lagu qoray qandaraas gaara muddo aan la xaddidin, kaalimaha gaarka ee ku meelgaarka oo laga abuurayo Maamulada nidaamyadooda ay bixinayaan jagooyinka caafimaad xitaa haddii aanay lahayn kaalimo gaara; sidoo kale ka faaidaysiga shaqaalahaas iyaga, suurtaganimada xitaa kuwi madaxda ka ahaa wakaladaha dawlaadda ama maxalliga, iyadoo laga reebayo kuwa loo qabtay sadex bilood oo ka bilaabata dhaqangalka xeerka wakiilashada muddada lagu sheegay faqradda koobaad qod. 7.

b) ballaarinta shaqaalaha ku jooga qandaraska nooca muddada aan xaddidnayn ee jagooyinka madaxnimada ee Maamulka tareenada marka laga soo bilaabo 1 Jannaayo 1951 Xeerka 30 Nofember 1952, lamba. 1844;

c) ku meelaynta kaalimaha ku-meelgaarka ee shaqaalaha aan joogtada ku ahayn Maamulkii Afrika Talyaaniga ee amarka ka qaata Machadka dhexe ee tirakoobka sida ku cad qod. 13 xeerla 2 prol 1952,lr. 201. Shaqaalahaas, dhammaadka amarka, waxaa loo qoondaynayaa in ay ka shaqeeyaan Maamulka Dawladda, xitaa kuwa nidaamka madax bannaan leh.

### **Qod. 19**

Amarrada Xeerkaan waxaa lagu dabbaqayaa xitaa shaqaalaha qaybaha dhan iyagoo loo tixgalinayo tariikhda uu xeerkanu dhaqangalay, ee shaqada ka hayay Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaalia ama dalalka liibiya iyo Eritrea. Shaqaalaha waqtiga xaadirka ka shaqeeya dalalka la soo sheegay kuwooda shaqadu ka joogsatay sida ku cad qod. 7, waxay sii haysanayaan xaq dhaqaalaynta dhaqaalaha ee la xariira muddada fasaxa caadiga ee u bislaaday oo aan helin marka la meelayay nasashada la geliyay.

### **Qod. 20**

Qaraar gooniya, oo la geeyo Baarlamaanka si loo meelmario marka affar bilood laga joogo xeerkaan, waxaa lagu warejinayaa Machadka Afrikada Talyaaniga hawlgalladii iyo

qalabkii cilmiga sayniska iyo dhaqanka ee Wasaaraddii Afrikada Talyaaniga ee la baai'iyay, oo ay ku jiraan Madxafkii gumaystaha.

a) Isla qaraarkaas waxaa lagu diyaarinayaa dib u-habaynta qaab-dhismeedka iyo dhaqangalka Machadka la soo sheegay sidii uu qaban lahaa xilalalka loo igmaday: dhanka cilmi baarista Afrika iyo faafintooda ee la xariira gaar ahaan horukaca qaaraddaas iyo gacan-siinta talyaaniga eehawlahaas;

b) ulajeedooyinka diyaarinta dhaqanka iyo gaarka ee shaqada.

#### **Qod. 21**

Lacagaha loo qoondeeyay xaaladaha lagu saadaalinayo kharashka Wasaaradda Afrika Talyaaniga ee ku saabsan hawlgallada maaliyadeed 1952-53, iyo sidoo kale kuwii horay u jiray ee aha haraadigii hawlgallada la soo dhaafay, waxaa loo warejinayaa si ku-meelgaara labada madax ee gaarka ee xaaladaha saadaasha kharshka Wasaaradda Khasnadda hawlgallada socda, midka koonaad ee ku saabsan helitaanka iqtisaaska hawlgallada 1952-53, iyo kan kale oo ku saabsan helitaanka haraadiga.

Wasiirka Khasnadda wuxuu tartiib-tartiib ku diyaarinayaa dekereeto loogu qoondeeynayo lacagaha iyaga Maamulada iyo Wakaaladaha loo warejiyay hawlihii Wasaaraddii Afrika Talyaaniga ee la baabi'iyay, iyadoo loo eegayo qaddarka la hubiyay ee la heli karo iyo culayska ay xambaarsanyihiin midkasta oo ka mida qoondayntaas.

#### **Qod. 22**

Lacagta shaqsiga ee ku cad faqradda labaad qod. 14 ee xeerka 5 Juun 1951, lr. 376, waa qaybta ku saabsan mushaarka, lagu geli karo hawlgabka.

Xeerkaan, oo wata moorka/shaabbadda Dawladda, waxaa lagu darayaa Uruurinta rasmiga ee xeererka iyo dekeretooyinka Jamhuuriyadda Talyaaniga. Waxaa ku waajib ah cid kasta oo uu la soo gudboonaado in ay u hoggaansanaato ka xeer Dawladeed ahaan.

Taariikhda Roma, 9 Abril

Einaudi

**De Gaspero --- Pella**

Waxaa hubiyay: Ilaaliyaha Shaabadda: **Zoli**